



## Caawimada Maaliyadeed ee Park Nicollet Health Services

### Financial Assistance at Park Nicollet Health Services—Somali

Park Nicollet Health Services waxay bixisaa caawimo maaliyadeed. Macluumaadka ku saabsan xaq u yeelanshaha, IY shuruudaha ku xiran, sida loo codsado, iyo sida loo xisaabiyo helitaanka caawimada maaliyadeed waxaa si buuxda loogu qeexay Nidaamka u degan habka bixinta Caawimada Maaliyadda ee Park Nicollet. Si aad bilaash ugu heshid koobiyada Siyaasadda Caawimada Maaliyadeed iyo foomamka codsiga si online ah, si loo codsado koobiyo bilaash ah iyadoo boosta lagugu soo dirayo, ama caawimo la xidhiidha nidaamka codsiga, fadlan booqo ama la xidhiidh Park Nicollet sidan soo socota:

Bogga internetka: [healthpartners.com/FA](http://healthpartners.com/FA)  
Goobta: Cusbitaalka Park Nicollet Methodist  
South Admitting, Suite 1-615  
6500 Excelsior Blvd  
St. Louis Park, MN 55426

Telefoon/Fakis: 952-993-5586 La-talliyayaasha Maaliyadeed  
952-993-7672 Adeegyada Loo-adeegaha  
888-826-6958 Adeegga loo-adeegaha – Telefoonka bilaashka ah  
952-993-2770 Fakiska – Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka

### XAQ U YEELANSHO AMA SHURUUDAHA KU XIRAN

Park Nicollet Health Services waxay xisaabisaa caawimada maaliyadeed iyadoo ku salaynaysa dakhliga qoyska bukaanka iyadoo barbardhigaysa waxa lagugu magacaabo Heerka Faqiirtinimo ee Federaalka (FPL). Bukaanaada dakhliga qoyskoodu uu ka yarahay 275% FPL ka waxuu heli doonaan qiimo dhimista ugu weyn. Ka saraynta 275% ee FPL, heerka caawimada maaliyadeed waxay ku salaysnaan doontaa dakhliga qoyska, tirada qoyska, iyo inta uu dhan yahay kharashka daawaynta ee lagu soo dalacay. Fadlan si aad macluumaad dheeraad ah u heshid dib ugu noqo oo akhri Nidaamka u degan habka bixinta Caawimada Maaliyadeed ee Park Nicollet wixii macluumaad dheeraad ah. Haddii bukaanka loo fidiyay gargaar caafimaad oo degdeg ah ama daryeel kale oo caafimaad lagama maarmaan ah daryeel kaasna ka helay Isbitaalka Methodist isla markaana buuxiyay shuruudaha ku xiran helitaanka caawimada maaliyadeed, Isbitaalka Methodist kuma dalici doono in ka badan biilasha ay sida caadiga ah bixiyaan bukaanaada leh caysmiska caafimaad.

### SIDA LOO CODSADO

Si loo codsado caawimada maaliyadeed, bukaanaada waxa waajib ku ah inay buuxiyaan foomka codsiga oo ay ku soo celiyaan shaqsi ahaan Park Nicollet, inay boostada ku soo diraan ama fakis iyagoo isticmaalaya macluumaadka lagala xidhiidhayo ee xagga sare ku xusan. Bukaanaada waxa la waydiin doonaa inay keenaan dukumenti caddaynaya dakhliga (sida canshuurtii u dambaysay federaalka ee ay xareeyeen, jeegagii aad qaadatay 60kii beri ee u dambaysay, warqado cadaynaya inaad qaadatid lacagta Sooshaal sakuurati bixiyaan/ama lacagta la siiyo dadka shaqo la'aanta ah iyo kuwa naafada ah ama heshiis tusaya in qofkii aad is furteen lacag ku siiyo) iyo macluumaad ku saabsan caymiska daryeel caafimaad ee bukaanka ee hadda ama dhowaan uu heli karo (sida Medicaid, Medicare ama keen caymis). Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan dib ugu noqo oo akhri Nidaamka u degan habka bixinta Caawimada Park Nicollet ama la xidhiidh Xafiiska Loo-adeegaha 952-993-7672.

### TURJUMAADAHA

Nidaamka u degan habka bixinta gargaarka maaliyadeed ee Park Nicollet's oo turjuman, iyo arjiga lagu codsanayo oo turjuman kuna qoran luuqad si fudud loo fahmayo ayaa lagu heli karaa luqaddo dhawr ah oo loogu talloagalay bukaanaada Ingiriisidoodu ay xaddidan, yahay iyadoo loo tixgali-nayo bulshooyinka ay u adeegto Park Nicollet. Turjumaadaha hadda waxa lagu heli karaa Spanish, Somali, iyo Vietnamese. Koobiyo bilaash ah, fadlan booqo bogga internetka ee HealthPartners ama codso koobiyada adigoo isticmaalaya macluumaadka lagala xidhiidhayo ee xagga sare ku xusan.